

## Xaashida Macluumaadka

Ogolaanshaha in loo shaaciyo macluumaadka shakhsiga ah qaybo kale.

Waa inaad adeegsataa foomka (MR049) oo ah “Ogolaanshaha in loo shaaciyo macluumaadka Shakhsiga ah qaybo kale” si aad u amarto IHMS inay u-siidaayaan macluumaadkaaga shakhsi oo hadda jira (oo ay ka mid yihiin macluumaadka xasaasiga ah iyo kan caafimaadka), sida ku qeexan Xeerka Gaarnimada ee Australia 1988, haya’daha/Wakiilada aad hoos ku liis-garaysay. Waxay kaloo ku siinaysaa fursadda inaad amarto IHMS si ay u shaaciyaan diiwaannada mustaqbalka oo ay ku jiraan macluumaadka shakhsi.

Markaad bixinayso ogolaanshahaaga, waa inaad naftaada ku wargelisaa siday u adeegsan doonaan macluumaadkaaga shakhsi haya’daha ama Wakiillada aad siinayso helidda, ilaa intee haya’daha ama Wakiilada ayey doonayaan inay hayaan macluumaadkaaga shakhsi iyo ammaanka ay ku bixin doonto macluumaadkaas. Waa inaad kaloo naftaada ku wargelisaa khataraha ku jira siinta macluumaadkaaga shakhsi (oo ay ka mid yihiin macluumaadka xasaasiga ah iyo kan caafimaadka) cid kale. Taasna waxaa loo yaqaan ahaanshaha mid wargashan, markaasna ogolaanshaha aad bixinayso wuxuu noqon doonaa “ogolaansho wargashan”. IHMS waxay u baahan tahay inay ku faraxsan tahay in markaad bixiso ogolaanshaha, inaad bixinayso ogolaansho wargashan. Kaalatalintaada inaad naftaada ku wargeliso adeegyada iyo khataraha ku jira in IHMS u shaaciso macluumaadkaaga shakhsiga ah haya’daha ama Wakiilada IHMS waxay tixgelinaysaa in ogolaanshahaaga lagu bixiyey Foomka Ogolaanshaha inuu noqon doono ogolaansho wargashan.

Waxaad kaloo u baahan tahay inaad xusuusato inaad baabi’n karto ama wax ka baddeli karto ogolaanshahaaga mar kasta adigoo siinaya IHMS amar qoraal ah oo dheeraad ah.

Fadlan hubi inaad si taxadar ah u aqriso Foomka Ogolaanshaha. Haddii aad u baahan tahay caawimaad inaad fahamto shuruudaha ka dibna fadlan hubi inaad weydiiso IHMS. Ka dib markii aad saxiixdo, hubi inaad haysato koobiga Foomka Ogolaanshaha aad saxiixday si aad ugu haysato tixraac mustaqbaleed.

Xaga go’aaminta shaacinta macluumaadkaaga shakhsi IHMS waxa keliya oo ay sidaas u samayn kartaa haddii shaacintu ay sharci tahay ayna ku habboon tahay Xeerka Gaarnimada Australia.

Qaybta	Tilmaamidda <i>(Fadlan la soco haddii aadan ku dhaqmin tilmaamiddaas hoos ku qoran markaas taasi waxay keenaysaa in IHMS ay diiddo foomkaaga ogolaanshaha ilaa inta foomka si quman loo buuxinayo)</i>
Qofka Bixinaya Ogolaanshaha	Dhammaan waa in la soo buuxiyaa ayadoo la deegsanayo alfabeetada Ingiriisiga ah, lambaraynta iyo taariikhaynta nadaamka iyo qaabka, iyo keliya xarfaha waaweyn halkii ku habboon.
Ogolaanshaha Waalidka/Ilaaliyaha Sharciga ah	<p>Carruurta ka yar da’da 16 sano waa inay leeyihiin waalid ama ilaaliye sharciyeed oo laga aqoonsan yahay dowladda kaasoo idma ogolaanshaha macluumaadka shakhsiyeed ee ilmaha si loo shaaciyo.</p> <p>Carruurta laga bilaabo da’da 16 iyo ilaa da’da 18 sanadood waa inay bixiyaan ogolaanshahooda inay jirto caddayn caafimaad mooyee taas oo ah in ilmahu la’yahay awooddii uu ku bixin lahaa ogolaansho wargashan. Waalidka ama ilaaliyaha sharciga ah keliya ayaa amri kara shaacinta macluumaadka shakhsiyeed ee koox da’eedkan haddii ilmahu, kaas oo awooda ogolaansho wargashan, uu qoraal ku ogolaado amarka ay siiyeen waalidka ama hay’ad sharciga ee IHMS.</p> <p>Qofkii ka weyn da’da 16 kaas oo uu xaqiijiyey, dhaqtar caafimaad oo tababaran, inuu la’yahay awooddii uu ku bixin lahaa ogolaanshaha wargashan wuxuu yeelanayaa ilaaliye sharci oo ay magacaabtay haya’d habboon. Ilaaliyaha sharciga ah, ama waalidka, wuxuu saxiixi karaa Foomka Ogolaanshaha asagoo matalaya qofkaas.</p> <p>Ilaaliyaha dacwada wuxuu kaloo amri karaa shaacinta macluumaadka shakhsiga ayadoo ujeeddada keliya ee dacwadu tahay ilaalinta la amray.</p>

<p>Ogolaanshaha</p>	<p><u>Haya'dda/Wakiilka:</u>                  Keliya hal hay'ad ama hal wakiil waa in lagu aqoonsadaa foomka ogolaanshaha. Haddii laba ama in ka badan lagu qoro, IHMS waxa keliya oo ay eegi doontaa haya'dda ama wakiilka kowaad oo ku qoran liiska. Haddii aad jeceshahay inaad macluumaadkaaga shakhsiyeed siiso laba haya'dood ama wakiil ama wax ka badan markaas waxaad u baahan doontaa inaad u soo buuxiso foomamka ogolaanshaha oo kala duwan mid kastoo hay'adda iyo/ama wakiilka ah.</p> <p><u>Macluumaadka shakhsiga ee gaarka ah oo ay shaacinayso IHMS:</u>                  Waa inaad si qeexan hase ahaatee kooban u aqoonsataa wax uu yahay macluumaadka aad amrayso IHMS inay u shaaciso hay'addaada ama wakiilkaaga aad soo magacaabatay. Tusaale, "faylka caafimaadka oo dhan", "wax la xiriira dhaawaca gacanta", "diiwaanada caafimaadka dhimirka", iwm.</p> <p><u>Macluumaadka shakhsiga ee mustaqbaleed:</u>                  Foomka ogolaanshaha wuxuu sax yahay taariikhda ogolaanshahaas la bixiyey (ayna ku jiraan Macluumaadka Shakhsi oo hadda jira). Haddii aad jeceshahay diiwaanada mustaqbaleed (kaas oo ah, Macluumaadka Shakhsi ay qaadayso IHMS ka dib taariikhda ogolaanshaha) si ay u heli karaan haya'ddaada ama wakiilkaaga aad soo magacawday ka dibna waa inaad saxiixdaa Foomka Ogolaanshaha halkii lagu muujiyey "Macluumaadka Shakhsi ee Mustaqbaleed". Haddii aan wax saxiix ah lagu qorin booskaas markaas IHMS waxay arintaas u fasiran doontaa inaad bixin wax ogolaansho ah ee mustaqbalka diiwaannada si loo shaaciyo.</p>
<p>Xaqijinta IHMS ee Saxiixa</p>	<p>Waa inaad hubisaa in markaad doonayso inaad buuxiso Foomka Ogolaanshaha inaad ku hor-saxiixdo Foomka dhaqtar caafimaad oo ay howlgelisey kilinikada caafimaadka IHMS haddii aad degan tahay tas-hiilaadka xabsiga socdaalka ama Xarunta Baro-seesgaraynta Goboleed, ama dhaqtar caafimaad oo ay soo magacawday IHMS kaasoo ah bixiyahaaga caafimadka bulshada haddii aad degan tahay bulshada dhexdeeda (kani waa dhaqtarka guud oo ay kuu soo magacawday IHMS haddii aad degan tahay Xabsiga Bulshada ee Australia ama dhaqtarka caafimaad ee Nauru Settlement Clinic ama East Lorengau Refugee Transit Centre oo ku yaal Manus Island)). Haddii aad fiiso ku dhex degan tahay bulshada Australia markaas ka dib waa inaad adeegsan Foomka Ogolaanshaha, taas baddelkeedana inaad si toos ah u codsato inaad hesho Department of Immigration and Border Protection halkay ku taal Australian <i>Freedom of Information Act</i>.</p>

### QOFKA BIXINAYA OGOLAANSHAHA ("QOFKA") (qaybtan waa in la dhammaystiraa)

Magaca:	Lambarka Aqoonsiga:
<input type="checkbox"/> Lab <input type="checkbox"/> Dheddig	Taariikhda Dhalashada: _____ / _____ / _____ Da'da:
Luqadda:	Turjumaan la-adeegsaday: Haa <input type="checkbox"/> Maya <input type="checkbox"/>
Lambarka turjumaan:	

### OGOLAANSHAHA WAALIDKA/LAALIYAHA SHARCIYEED

(Keliya in la dhammaystiro haddii Qofku uusan awoodin inuu baxsho ogolaansho: qaybtan waa in laga tagaa ayadoo bannaan haddii Qofku awoodo inuu baxsho ogolaansho)

Magaca:	
Da'da Dhalashada:	Xiriirka uu la leeyahay Qofka:

### OGAYSIINTA XAQIJIINTA OGOLAANSHAHA IYO XAQA BAABI'NTA

**Anigoo saxiixaya foomkan ogolaanshaha waxaan qirayaa in ogolaanshahaygu halkan uu sax ahaan doono ilaa aan ka noqdo ama ka dib muddo shan (5) sano ah oo laga bilaabo taariikhda aan bixiyey ogolaanshahan (hadba kan soo horreeya). Waxaan fahamsanahay inaan baabi'n karo ama baddeli karo ogolaanshan mar kasta anigoo siinaya amar qoraal ah Adeegyada Caafimaadka iyo Daaweynta Caalamiga ah (International Health and Medical Services Pty Limited (IHMS)).**

### OGOLAANSHAH

(dhammaan qaybaha hoose waa in la dhammaystiraa)

**IHMS, oo ay ku jiraan qayb-hoosaadkeeda, waxaa halkan lagu idmay oo lagu amray in loo shaaciyey Macluumaadkayga Shakhsiyeed ee hadda ah (oo ay ka mid yihiin macluumaadka xasaasiga ah oo ay hayso IHMS) ) sida hoos ku muujisan ee Haya'daha ama Wakiilkayga la magacaabay (lagu muujiyey hoos):**

<b>Haya'daha ama Wakiilka</b> (Keliya hal Hay'ad ama Wakiil waa in la qoraa: foomam kala duwana waa in loo adeegsadaa Haya'dii/Wakiilkii kasta oo la magacaabay.	<b>Macluumaadka Shakhsi oo Gaarka ah ay tahay inay IHMS shaaciso</b>
---	--

<b>Saxiixa Qofka</b> (ama Waalidka/Ilaaliyaha haddii Qofku uusan awoodin inuu baxsho ogolaansho):	<b>Taariikhda Ogolaanshaha:</b>
--	---------------------------------

**IHMS, oo ay ku jiraan qayb-hoosaadkeeda, waxaa halkan lagu idmay oo lagu amray in loo shaaciyey Macluumaadkayga Shakhsi ee mustaqbaleed (oo ay ka mid yihiin macluumaadka xasaasiga ah oo ay hayso IHMS) Haya'daha la magacaabay ama Wakiilkayga (sida kor lagu muujiyey) ayadoo la raacayo dalabka sharciga ah ee Haya'daha /Wakiilkayga la magacaabay:**

<b>Saxiixa Qofka</b> (ama Waalidka/Ilaaliyaha haddii Qofku uusan awoodin inuu baxsho ogolaansho): (Qaybaha saxiixa iyo taariikhda ee hoose waa in laga tagaa ayadoo bannaan haddii diiwaannada <u>mustaqbalka</u> aysan shaacinayn IHMS).	<b>Taariikhda Ogolaanshaha:</b>
--	---------------------------------

**Ogolaanshaha afkaa (Adeegsiga Shaqaalaha IHMS Keliya) –** Ogolaanshaha afka ah waxa keliya oo loo adeegsadaa halkii aysan suurtagal ahayn in la helo ogolaansho qoraal ah: *Haddii ogolaanshaha afka ah uusan ku habboonayn, qaybaha saxiixa iyo taariikhda ee hoose waa inay bannaanaadaan):*

Waan kala hadlay shaacinta la soo-jeediyey Qofkaas. Waxaan ku qanacsanahay in Qofka uu fahamsan yahay shaacinta la soo-jeediyey wuxuuna siiyey ogolaanshiisa wargashan kuwaan.

Saxiixa Dhaqtarka Caafimaadka ee IHMS:	Magaca Dhaqtarka Caafimaadka ee IHMS:	Taariikhda:
--	---------------------------------------	-------------

### XAQIJIINTA IHMS EE SAXIIXA QOFKA

(ama Waalidka/Ilaaliyaha sharciga haddii Qofku uusan awoodin inuu baxsho ogolaansho)

Dhaqtarka caafimaadka oo ay howlgelisey IHMS, waxaan xaqiijinayaa in qofka uu saxiixisu ka muuqdo qaybta Ogolaanshaha ee kore uu yahay saxiixii Qofka uu ku socdo Foomka Ogolaanshaha (ama, sidaas baddalkeeda, haddii Qofku uusan awoodin inuu baxsho ogolaansho wargashan iyo in saxiixu yahay saxiixa Waalidka ama Ilaaliyaha sharciga ah ee Qofkaas).

Saxiixa Dhaqtarka Caafimaadka ee IHMS:	Magaca Dhaqtarka Caafimaadka ee IHMS:	Taariikhda:
--	---------------------------------------	-------------